# HABRAACA XEERDEJINTA BAARLAMAANKA

## Horudhac

Shaqada aasaasiga ah ee Golaha Xeerdejintu waa inay sharciyada dejiyaan, wax-kabeddelaan ama buriyiaan. Habraaca xeerdejinta waxaa lagu qeexi karaa habka loo marayo soojeedinta xeerdejin oo la horgeeyo Baarlamaanka, si loogu beddelo Sharci ama Xeer.

# WAA MAXAY HINDISE-SHARCIYEED?

Hindise-sharciyeedku waa waa hindise la horgeynayo Baarlamaanka, kuwaas oo noqon kara:

**HINDISE SHARCIYEED CUSUB**

**WAX-KABEDDELID XEER**

**Burin Xeer**

# CURINTA HINDISE-SHARCIYEED?

XUKUUMADDA FEDERAALKA

UGU YARAAN 10 XILDHIBAAN GOLAHA SHACABKA

UGU YARAAN HAL WAKIIL DAWLAD GOBOLEED

GUDDIGA KA MID AH AQALKA SARE

# SHARCI SAMEYNTA IYO MAABAADIIDA KALA QAYBINTA AWOOODAHA

- Ma jirto hal hay'ad oo leh awood kama dambeys ah;
- Hay'adaha dawladda midba mida kale ayay koontorooshaa (isu-dhelitir ***"Check and Balance"***);
- Dhammaan laamaha dawladda oo kooban tahay (Fulinta, Sharci-dejinta iyo Garsoorka) mid kasta waxay ku shaqaysaa awoodeeda iyadoo ka madaxbannan midda kale.

# SHARCI SAMEYNTA IYO MAABAADIIDA KALA QAYBINTA AWOOODAHA

**Shaarci-dejin**

**Fulin**

**Garsoorka**

Ansixinta Shuruucda

Fulinta/ Dhaqangelinta Xeerarka

Fasiraadda Shuruucda

# NIDAMAAMKA BAARLAMAANIGA

- Laanta Fulinta (xukuumadda) ayaa mas'uul ka ah dejinta siyaasadda iyo habraaca sharci samaynta;

- Hindise Sharciyeedka wuxuu ka soo unkumaa fulinta kadib ayuu u soo wareegaa Laanta Sharci-dejinta;

- Halkani ma kala cada kala qaybinta awoodaha u dhexeeya laanta fulinta iyo sharci-dejinta marka laga eego habraaca sharci-sameeynta;

- Laanta fulinta waxay saameyn ku yeelanaysaa awoodda sharci-dejinta, sababtoo ah baalamaanka ayay ku leeyihiin aqlabiyadd.

# NIDAMAAMKA MADAXTOOYADA

- Mabaadii'da adag ee kala saaridda awoodda ;
- Madaxweynaha wax awood ah kuma lahan nidaamka sharc-dejinta ;
- Doorkiisa waa in uu maraa laanta fulinta marka laga eego dhanka xiriirka sharci sameeynta.

# NIDAMAAMKA MADAXTOOYADA NUSKA AH

- Nidamaamka Madaxtooyada nuska ah madaxa dawladda ma ahan madaxa xukuumadda;

- Dalka Faransiiska, hindise sharciyeed waxaa keena R/Wasaaraha kaasoo leh awoodda sharci unkumidda ;

- Dastuurkii 1958 ee dalka Faransiiska wuxuu dejinaayay in hindise sharciyeed baarlamaanka la keeni karo oo keliya kadib marka uu Golaha Wasiiradda ay uga doodaan golaha dhexdiisa go'aanna ka gaaraan.

# DOORKA SHARCI-DEJINTA

- Dastuur dal uu leeyahay ayaa badanaa go'aamiya qaab-dhismeedka sharci-dejinta iyo sida ay ula falgeleyso laanta Fulinta iyo Garsoorka;
- Isku dheelitirka awoodda go'aan gaarista ee u dhaxaysa laanta sharcidejinta iyo laanta fulinta waa furaha ugu muhiimsan ee dumuqraadiyadda casirga ah "***modern democracy***";
- Tayada sharci-dejinta ee ugu kuurgelidda iyo saamaynta ay ku leeyihiin go'aannada laanta fulinta ma han oo keliya ansixinta ama meelmarinta go'aannada fulinta, balse hubinta isku dheelitirnaanta ***"checks and balances"*** ayaa ah mid looga baahan yahay xukuumad demuqraadi ah oo xoogan;
- Nidaamka dimuqraadiga ah ee sharci dejinta waxay wakiil ka tahay oo matashaa talinta Shacabka ***"rule by the people".***

# DULMARKA DOORKA SHARCI-DEJINTA



# QAAB-DHISMEEDKA SHARCI-DEJINTA SOOMAALIYA

- ❖ Baarlamaan ka kooban Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare ***(Qodobka 55)*** ee KMG.

- ❖ Taariikh ahaan dastuurka Soomaaliya ee hore ma aysan lahayn Baarlamaan ka kooban labo aqal.

# SHARCI-DEJIN IYO NIDMAAKA FEDERAALKA

- Qaabaynta Nidaamka Federaalka wuxuu xaqiijinayaa is xukun heer dawlad Goboleed iyo xukun wadaag heer qaran;

- Xukun wadaagga wuxuu si dhab ah ku hirgeli karaa marka la dhiso hay'ado iyo habraacyo kaga qaybgeli karaan wakiilada matalaya dawlad goboleedyada habraaca go'aan gaarista ee heer qaran;

- Habka ugu caansan ee lagu xaqiijin karo xubnaha dawlad goboleedka ee matalaya kagana qaybgeli karaan arrintaasi waxay tahay ***Aqalka labaad ee baarlamaanka***;

# AQALKA LABAAD

- Doorka nidmaaka Federaalka uu ku qaabaynaayo sharci-dejinta waxay ka imaanaysaa Aqalka labaad;
- Aqalka labaad waxaa lagu dhisay in nidmaayada federaalka lagu xaqiijiyo '***xukun-wadaag***' iyo in dawlad goboleedayada ama xubnaha ka tirsan federaalka ay ku yeeshaan wakiilo marka la gaarayo go'aan heer qaran;
- Wadamo badan oo federaal ah waxay samaysteen aqalka labaad;
- Hase ahaatee qaab-dhismeedkooda, xeerarka go'aan gaaristooda iyo awoodahooda way ku kala duwan yihiin dawladaha federaalka ah;

# HABRAACA SHARCI SAMAYNTA DALKA SOOMAALIYA

## 2017-2023 Xeer Hoosaadka Baarlamaanka

### Golaha Shacaba

1. Akhrinta Koowaad
2. Akhrinta Labadaa(ka doodid, wax ka bedelid ma lahan)
3. Heer Guddi(wax ka bedel wuxuu u soo gudbinayaa aqalka)
4. Heerka warbixinta
5. Akhrinta seddexaad

### Aqalka Sare (Hypothetical)

1. Akhrinta koowaad
2. Aqrinta labaad
3. Heerka guddi
4. Heerka warbixinta iyo Aqrinta seddexaad

---

1. Aqalka Sare Ansixin/Wax-ka-bedelid/ Diidis
2. GSH wuu ogolanyaa wax-ka-bedelka ama wuu diidayaa / ama ku burin codayn 2/3
3. U dirid Madaxweynaha si uu u saxiixo

Ogolaansho (hidise sharciyeedkii wuxuu noqonayaa shrci)

# HABRAACA SHARCIDEJINTA: GOLAHA SHACABKA



HABRAACA SHARCIDEJINTA: AQALKA SARE



# HALKEE LAGA SAMEEYAA SHARCIGA?

- Dastuurka wuxuu leeyahay sharci waxaa sameyn karo Golaha Wasiirada, Golaha Shacabka ama Aqalka Sare. Halkee ayaa laga sameeyaa sharciga?

- Haddii sharci laga soo diyaariyay laanta fulinta, doorka sharci-dejinta waxay noqonaysaa mid culeyska ay saarto hay'adaha dawladda ay dejiso siyaasadda iyo diyaarinta shuruucda.

- Tusaale waxaa ka mid ah su'aalo weydiinta baarlamaanka uu weydinaayo wasiirada/R-wasaaraha, baaritaan lagu sameeynaayo habraaca siyaasadeed, ku dhiirigelinta warbaahinta in ay culeys saaraan, iyo wargelinta xubnaha ka tirsan federaalka siyaasad sameynta.

# SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGAAH

## Daraasad: UK



# GUDDIGA JOOGTADA - Daraasad: UK



- Wuxuu ka kooban 16 ilaa 50 xubnaha Baarlamaanka
- Xubnihiisa wuxuu ku jaan go'anyahay isku dheeli tirka xisbiyada iyo khubaro.
- Laguma samaynayo wax-ka-bedel marka uu heerka guddiyada uu marayo

# SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGA AH

Daraasad ku saabsan: Italy



# SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGA AH

Daarasad ku saabsan: Italy




SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGA AH

# SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGA AH

Daraasad ku saabsan: Germany

- Nidaam labo Aqal ah
- Nidaam Labo Aqal aan sinayn
  - Budestag, Bundesrat

**Bundestag (Aqalka Hoose)**



**Bundesrat (Aqalka Sare)**



# SHARCI SAMEYNTA NIDAAMKA BAARLAMAANIGA AH

## Daraasad ku saabsan: Germany

- Nidaam labo Aqal ah
- Nidaam Labo Aqal aan sinayn
  - Budestag, Bundesrat
  - Awooda sharci samaynta waxay ku uruursan tahay aqalka hoose, halka Aqalka sare la siiyay diidmada qayaxan oo uu wax ku laali karo
  - Hindise sharciyeed waxaa bilaabi kara xukuumadda, 5% xubnaha (Bundestag) Aqalka hoose, ama dhamaan xubnaha Aqalka Sare (Bundesrat)
- Aqalka Sare (Bundesrat) wuxuu leeyahay diidmada kama dambaysta ah ee qayaxan ee shuruucda saamaynta ku leh dowalad goboleedyada (Länder), iyo diidmada qayaxan ee laalan ee shuruucda kale.

# Sharci Sameynta Nidaamka Baarlamaaniga ah

## Daraasad ku saabsan: Germany



# Sharci Sameynta Nidaamka Baarlamaaniga ah

## Daaras ku saabsan: Germany

- Diidmada qayaxan ee kama dambaysta ah



# SHARCISAMAYNTA KONGAREESKA

## Daraasad ku saabsan: USA

- Afar qabood oo sharci samayn ah: hindise sharciyeed qaraar wadajir ah, qaraar awood siman iyo qaraar sahlan.
- Hinidse sharciyeedka waa midka caanka oo bilwga sharciga ah

- Hindise sharciyeedka waxaa lagama maarmaan inay ku heshiiyaan qaab isku mid ah:

1. Waxaa Anisinaya Madaxweynaha;
2. Haduu ku guuldareeysto Madaxweynaha inuu ku soo celiyo hindise sharciyeedka iyadoo la socoto diidmadiisa  uu ku soo celiyo Aqalkii uu ka soo bilaabay sharciga marka kongreeska uu u ku jiro Kalfadhigiisa;
3. Diidmada qayaxan ee Madaxweynaha waxaa lagu burin karaa codayn seddex meelood labo meel ee Aqalkasta.

# Guddiyada Kongeeska

## Daraasad ku saabsan : USA



- Guddiyada ay khuseeyso mowduuca
- Xubnaha guddiga waxay u qaybsamaan labada xisbi ee waaweyn
- Awooda waxaa u go'aamiya Aqalka
- Waxaa laga dhagaysanayaa fasiraad hindisa sharciyeedka cida keentay, waxay soo dhawaynayaan aragtida khubarada, waxay su'aalo weeydiinayaan wakiilada hindise sharciyeedka keenay, warbixin waxay u gudbinayaan kal-fadhiga Aqalka

# MEEL MARINTA MADAXWEYNAHA EE KU XUSAN DASTUURKA SOOMALIYA

- Qod. 85aad ee Dastuurka KMG wuxuu qeexayaa:

- “Hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta ee ku xusan cutubkan, Madaxweynaha Jamhuuriyadduna saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga”

- Tan waxaa loo qaadan karaa in Madaxweynaha uu ka gaari karo go’aan hindise sharciyeedkan. Waxaa jira xeerar uu Madaxweynaha wax ku diidi karo taasnina way ka maqan tahay Dastuurkan, waxayna u baahan tahay in arrintaas la wajaho.

# MEEL MARINTA MADAXWEYNAHA EE KU XUSAN DASTUURKA SOOMALIYA

- Dastuurka 1960 ee Soomaaliaya wuxuu u ugolaanayaa Madaxweynaha inuu dib ugu soo celiyo baarlamaanka hal mar; hadiise hindise sharciyeedka ay marlabaad ay ansixiyaan baarlamaanka Madaxweynaha waxaa looga bahan yahay inuu saxiixo hindise sharciyeedka si uu u noqdo  Sharci.

# MEEL MARINTA MADAXWEYNAHA EE KU XUSAN DASTUURKA SOOMALIYA – Dastuurka 1960

- **Qodobka 61. <u>DHAQAN-GELIN IYO DAABACAAD</u>**

(1) Sharci kasta oo uu Goluhu ansixiyo waxaa dhaqan-gelinaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah marka la ansixiyo.

(2) Haddii uu Goluhu si aqlabiyad buuxda ah ee xubunihiisa, ugu dhawaaqo in ay jirto baahi deg-deg ah, waxaa sharcigaas lagu dhaqan-gelinayaa waqti xaddidan gudihiis oo uu Goluhu cayimayo, waxaase shardi ah in xaddidaadda waqtiga ee noocani aysan ka yaraan shan maalmood.

(3)Muddada loo cayimay dhaqan-gelinta gudaheeda, waxuu Madaxwaynaha Jamhuriyadda u soo gudbin karaa Golaha farriin uu ku codsanayo, isagoo sheegaya sababaha taasi keentay, in sharciga dib loo eego.

# Soc…

- (4) Haddii uu Goluhu ku ansixiyo sharciga noocani mar kale aqlabiyad dhan seddex meelood laba meel ($^2/_3$), waxuu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda ku dhaqan-gelinayaa soddon maalmood gudahood marka la ansixo.

- (5)Sharci kasta oo uu Golaha ansixiyo, Hoggaamiyaha Qarankuna dhaqan-geliyo, waxaa lagu daabacayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, waxuuna hawl-gal noqonayaa maalinta 15$^{aad}$ ee daabacaadiisa haddii uusan sharcigu si kale u dhigin waxaa lagu soo saarayaa dekreetada Madaxwaynaha Jamhuuriyadda kadib soo jeedinta Golaha.

# DOORKA SHARCI-DEJINTA EE HABRAACA SHARCI SAMAYNTA

- Fulinta ayaa awood badan ku leh habraac samaynta ha noqoto sida ku xusan Dastuurka ama ha noqoto hab farsamo oo u sahleysa Dastuur Samaynta ;

- Xeer-dejinta badanaa waxaa 'wareerin' danaha axsaabta siyaasadeed;

- Doorkee u harsan xeer-dejinta?;

- Iyadoo saamyn uu ku leeyahay deegaan doorashadooda ee xaga kooxaha ololeysa iyo kuwa danaha gaarka ah leh iyo sidoo kale sidii loo qaabayn lahaa talooyinka bulshada loona helilahaa daahfurnaan iyadoo la adeegsanayo warbaahinta.